

Somali

Casumaad

Nagu soo biir si aad noogu sheegtid waxay kula tahay ka qaybqaadashada barnaamijka isbarashada.

Salaan sare.

Dhamaan intii ka soo qaybqaadatay barnaamijka isbarashada ee Norway waxaa lagu casuumey iney ka qaybqaataan baaritaan guud oo lagu sameynayo barnaamijkaas.

Waxaan rajeyneynaa inaad ka faa.iideysatid fursadaan adoo ka jawaabaya su.aalo ku saabsan wixa ay kula tahay ka qaybqaadashada barnaamijkan isbarashada. Waa jawaabo go.an oo aad kala dooran karto.

Baaritaanka waxaa fuliyey agaasinka isdhixgalka iyo kala duwanaanta.

Si anaga iyo degmadaadu aan adiga iyo inta kale oo ka qaybqaadaneysa barnaamijka isdhixgalka ay u helaan adeeg wanaagsan waxaan ka qaybgalayaasha uga baahanahay khibradooda.

Waa mihiim inaad si furan oo daacad ah uga jawaabtid su.aalaha si aan u helo warbixin muujineysa wixii saxid u baahan. Ka soo qaad waxaa lagu weydiin doonaa inaad ku qanacsantahay waxbarashada aan ka qaybqaadaneysid ama inaad ka heshay inaad ka qaybqaadatid barnaamijka iyo iney jiraan wax aad u maleyneysid inuu ku xunyahay barnaamiju.

Khasab maahan inaad ka qaybqaadatid baaritaankan, waxayna qaadanaysaa 30 daqiqiyo inaad ka jawaabtid su.aalaha oo dhan. Ka qaybqaatuuhu waa qarsoodi. Jawaabahaaga lagooma soo celin doono.

Dhamaan warbixinta la helo waxaa maamulaya shaqaale ka socda agaasinka isdhixgalka iyo kala duwanaanta (imdi) iyo dad kale oo la soo xulay. Baarayaasha kaliya ayaa eegi kara jawaabaha. Ma jirto cid ka socota degmada ama meelo kale oo eegi karta wixii aad ku jawaabtey.

Degmadaadu waxay kuu fududeyn doontaa inaad ka qaybqaadatid baaritaankan.

Luuqada adigaa dooranaya. Iisticmaal badhamada luuqada ee bogga hoostiisa ah. Dhamaan su.aalaha iyo jawaabaha waxaad helaysaa iyagoo qoraal iyo codba ah. Iisticmaal badhamada-codka hadii aad rabtid inaad dhageysatid su.aalaha iyo jawaabaha.

Waa inaad ka jawaabtaa su.aalaha waraaqda ku yaal dhamaantood.

Waad ku mahadsantahay inaad ka qaybqaadaneysid baaritaankan!

Salaan sare

Agaasinka isdhixgalka iyo kala duwanaanta